



20-Mar-2020

*Qoysaska Sharafta leh ee Portland iyo xubnaha bulshada,*

*Waxaan u qoraayaa in aan kugu wargaliyo in Dugsiyadda Guud ee Portland ay dheereeyaan waqtiga xidhitaanka iskoolka, sababtuna tahay bulshada oo ku faafaysa COVID-19 gudaha Maine. Halkii aan xirneyn laba toddobaad, hadda waa la xiri doonaa illaa iyo 27-ka Abriil, Isniinta soo socota xilliga nasashada gu'ga. Dhamaan dhismayaashayada, oo ay kujiraan waxbarashada dadka waaweyn ee Portland iyo Dugsiga Sare ee Fanka iyo Teknolojiyada (PATHS) waa la xiri doonaa dadweynaha.*

*Nidaamkeena waxbarasho ee fog iyo barnaamijka qaybinta cuntada, oo biloowday Maarso 18-keeda, ayaa socon doona inta lagu gudajiro xiritaankan. Xiritaankan dheer waxaa sidoo kale ku jira fasaxayaga bisha Abriil, oo loo qorsheeyay inuu bilaabmo Jimcaha, Abriil 17 oo uu socdo illaa Jimcaha, Abriil 24.*

*Markii aan ku dhawaaqay qorshayaasheena xiritaanka bilowga Maarso 14, waxaan ka digayay inay macquul tahay xiritaanka inuu kusii nagaado labo todobaad ka badan. Maaddaama tirada kiisaska COVID-19 ee Maine ay sii kordhayaan oo ay jiraan caddayn ku saabsan gudbinta bulshada ee fayraska, waxaa cadaatay in xirnaashadeena asalka ah ee labada toddobaad aan ku filnayn inay ka caawiso ardayda iyo shaqaalahayaga inay nabad qabaan. Iyada oo ku xidhan duruufaha, waa suurtagal in waqtigan loo baahan karo in la kordhiyo.*

*Waxaan sidoo kale mar kale ku nuuxnuuxsanayaa in go'aankan ugu dambeeya la gaadhay si taxaddar leh. Xiritaanka iskuulada waa adag tahay dhamaan qoysaska, gaar ahaan xubnaha bulshada ee aan aad ugu liidan. Si kastaba ha noqotee, waxaan aaminsanahay xiritaankan dheeraadka ah inuu lama huraan u yahay ilaalinta caafimaadka qof walba.*

*Qalalaasahaani wuxuu nooga baahnaa inaan bilowno tijaabooyin balaaran xagga iskuulaadka guri guri iyadoo aan ogeysiis iyo waqti yar la diyaarin. Waxaan garowsanahay in barashada casriga ahi aysan bedeli karin khibradaha maalinlaha ah ee dugsiga, gaar ahaan ardayda ugu yar ee faa'iido doonka ah, oo ay ku jiraan ardaydeenna itaal darran, ardayda barta luqadda Ingiriisiga (ELL) iyo kuwa bilaa hoyga ah. Si kastaba ha noqotee, qof walba oo ka tirsan PPS wuxuu u heellan yahay inuu siiyo ardayda khibrada waxbarasho ee ugu wanaagsan ee suurtagalka ah duruufahaas aan horay loo arag. Waxaan idinka codsanayaa iskaashigaaga iyo taageeradaada maaddaama aan ku dadaalno sidii aan ardaydeenna ugu noqon lahayn waxbarasho joogto inta lagu jiro xilligan adag.*



*Si loo kordhiyo marin u helka barnaamijkeena cuntada, uma baahnno qoysaska inay carruurtooda u joogaan si ay cuntada u soo qaataan. Sidoo kale, waxaan ku dari doonaa Dugsiga Sare ee Portland sideedyada meelood ee kale ee cuntada ilaa maanta. Waxaan sii wadnaa inaan ka shaqeyno sidii aan ku heli lahayn aaladaha teknolojiyada gacanta qoysaska wali aan haysan. Fadlan ka raadi isgaarsiinta iskuulka cunugaaga faahfaahinta qeybinta.*

*Xaruntayada Macluumaadka ee 'POVID-19 (Coronavirus) Xarunta Macluumaadka ee websaydhkeena si joogto ah ayaa loo cusbooneysiyyaa. Waxaad ka heli kartaa wararkii ugu dambeeyay, ogaysiisyo aniga iga yimid iyo ilo kale, oo ay ku jiraan maqaal ku saabsan fageynta bulshada ee goobtaas.*

*Waxaad u adeegsan kartaa khadka taleefankayaga HelpDesk iyo emaylka qoysaska si aad uga hesho jawaabaha su'aalahooda iyo waxyaabaha ay ka welwelsan yihiin ee ku saabsan arin kasta inta lagu gudajiro xiritaanka. Lambarka taleefanka waa:*

*207-874-8159. Khadka taleefanka ee 'HelpDesk' wuxuu leeyahay marino luqado kaladuwan ah. Waxa kale oo aad noogu soo diri kartaa emayl luqaddaada koowaad [ppshelpline@portlandschools.org](mailto:ppshelpline@portlandschools.org).*

*Fadlan aamin. Waxaan sii wadi doonaa inaan si joogto ah ula xiriiro qoysaskeenna inta lagu jiro xiritaanka.*

*Xavier Botana*

*Kormeeraha Guud*

*P436- SOM Maarso 20 Waraaqda Xiritaanka Iskuulka*